

# Taarminaallada Bandhiga Muuqaalka

**MAINE**  
DEPARTMENT OF  
**LABOR**

Bureau of Labor Standards

Sharciga Taarminaallada Bandhiga Muuqaalka (VDT) ee Maine ayaa siinaaya xaquuqo gaar ah dadka kumbuyuutarka u adeegsada shaqada.



Sharciga Maine (Farqada 26 M.R.S.A. § 42-B) ayaa qasab ka dhigaaya in loo shaqeeye kasta uu boorkaan ku dhajiyo goobta shaqada gaar ahaan meel ay shaqaaluhu si fiican u arki karaan.

Boorkaan ayaa looga heli karaa barta oonleena ah si bilaash ah waxaana laga samaysan karaa nuqul:  
<https://www.maine.gov/labor/posters/>

## Taarminaallada Bandhiga Muuqaalka

MRSA Farqada 26 §251.

1. Laanta. "Laanta" waxaa laga wadaa Laanta Heerarka Shaqaalaha, Waaxda Shaqaalaha.
2. Shaqo siin. "Shaqo siin" waxaa laga wadaa in shaqo la siiyo ama loo ogolaado shaqo.
3. Shaqaale. "Shaqaaale" waxaa laga wadaa qof kasta oo qayb ka ah shaqo goos-goos ah ama joogto ah una shaqeeye loo shaqeeye ku yaala ama ganacsi ku leh Gobalka.
4. Loo shaqeeyaha. "Loo shaqeeye" waxaa laga wadaa qof kasta, iskaashato, shirkad, urur ama isbahaysi, dawladeed ama gaar loo leeyahay oo adeegsada 2 taarminaal ama ka badan hal meel.
5. Hawlwade. "Shaqaaale" waxaa laga wadaa shaqaale kasta oo shaqadiisa guud tahay inuu kashaqeeyo taarminaal wax ka badan afar saacadood oo xariir ah, bareegyo gaar ah, maalin kasta.
6. Taarminaal. "Taarminaal" waxaa laga wadaa mashiin koronto ku shaqeeya oo xogta kusoo bandhiga shaa shad, badanaana loogu yeero Taarminaallada Bandhiga Muuqaalka.

Si aad u aragto qoraalka buuxa ee sharciga booqo  
MRSA Farqada 26 §251, 252.

Haddii aad su'aalo ka qabto ku shaqaynta si badqab leh kumbuyuutarka, la hadal kormeerahaaga ama la xariir Waaxda Shaqaalaha ee Maine Laanta Heerarka Shaqaalaha Taleefankeeduna yahay:

**1-877-SAFE-345 (1-877-723-3345)**

Isticmaalayaasha

TTY ha wacaan Maine Relay 711.

Webseetka: [www.maine.gov/labor/bls](http://www.maine.gov/labor/bls)

limeelka: [bls.mdol@maine.gov](mailto:bls.mdol@maine.gov)

## Waxbarashada iyo tababarka MRSA Farqada §252.

Loo shaqeeye kasta waa inuu abuura barnaamij waxbarasho iyo tababar siiya dhammaan shaqaalaha sida ku cad qodobkaan.

1. Shuruudaha. Barnaamijka waxbarashada iyo tababarka ee loo shaqeeyaha waa in lagu bixiyaa qaab hadal ah iyo qaab qoraal ah, marka laga reebo loo shaqeeye adeegsada wax ka yar 5 taarminaal isku meel ayaa bixin kara barnaamijka waxbarashada tababarka oo qoraal keliya ah.

## Barnaamijka waa in lagu daraa, ugu yaraan:

- A. Ogaysiiska xaquuqda iyo waajibaadka ku cad cutub hoosaadkaan ayadoo lagu dhajinaayo meel loo wada jeedo oo goobta shaqada kamid ah nuqulka cutub hoosaadkaan.
  - B. Sharaxaada ama qeexitaanka isticmaalka saxda ah ee taarminaallada iyo tallaabooyinka difaaca ee shaqaaluhu qaadi karo si uu uga fogaado ama u yareeyo astaamaha ama xaaladaha keeni kara isticmaalka dabo dheeraaday ama aan qumanayn.
  - C. Tilmaan la xariirta muhiimada ilaalinta fadhiga habboon inta la wado shaqada taarminaalka iyo qeexitaanka qaababka loo gaaro loona joogteeyo fadhigaan, ayna ku jiraan adeegsiga qalabka wax laga badali karo ee goobta ee uu adeegsado loo shaqeeyuhu.
2. Aqoonta; Guriga nadaafada. Laantu waa inay kula talisaa loo shaqeeyaasha, adeegsiga barnaamijyada waxbarashada iyo tababarka, aqoonta badqabka shaqada kaasoo bixinaaya xog sax ah, cusub oo ku habboon adeegsiga taarminaalka.
  3. Jadwalka tababarka. Loo shaqeeyaashu waa inay siiyaan shaqaalaha barnaamijkaan tababarka iyo waxbarashada 30 maalmood gudahood marka shaqada bilaabaan iyo sanad kasta intaas kadib.